

Jidka METRO F Line ee cusub

Jidka 10 ayaa dhawaan yeelan doona gaadiid dheereeya.


METRO F Line waa leen bus rapid transit (BRT) kaas oo bixin doona adeeg gaadiid degdeg ah oo la isku halayn karo ee Waddada 10. BRT waa xirmo kor u qaadis ah oo ku kordhinaya safar dheereeya iyo waayo aragnimo horumarsan oo ku saabsan wadooyinka basaska ee ugu mashquulka badan Metro Transit.

METRO F Line wuxuu ku safri doonaa Nicollet Mall oo ku yaal bartamaha magaalada Minneapolis; Central Avenue oo sii marta waqooyi-bari Minneapolis, Columbia Heights, iyo Hilltop; iyo University Avenue ee loo maro Fridley iyo Spring Lake Park ilaa Northtown Mall ee Blaine.

METRO F Line waxa uu wanaajin doonaa marinka mashquulka badan:

- Metro Transit waxa ay la shaqaynaysaa MnDOT si ay isu waafajiso horumarinta gaadiidka iyo maalgashinada wadooyinka mara Jidka F si kor loogu qaado badbaadada iyo inay adeegsadaan dhammaan isticmaalayaasha, oo ay ku jiraan dadka lugaynaya, baaskiil wadayaasha, iyo dadka ku raaca gaadiidka Central Avenue.
- Sanadkii 2024, macaamiishu waxay ku raaceen gaadiid marar dhan 4.000 Jidka maalin kasta oo ah maalmaha la shaqeeyo, taasoo ka dhigaysa mid ka mid ah wadooyinka basaska ee ugu mashquulka badan Metro Transit.
- Raacitaanka waddada 10 ayaa weli ah mid xoogan, xitaa inta lagu jiro cudurka safmarka ah.

Ka eeg khariidad faahfaahsan barta metrotransit.org/f-line-project



Jadwalka Mashruuca Hordhaca
(waa la bedeli karaa)

• 2022-2023
QORSHAYNTA
• 2023-Present
INJINEERNIMO

• 2028
DHISMO

CIDA LAGALA XIRIIRAYO MASHRUUCA:
Nasser Mussa
FLine@metrotransit.org
651-829-5305

Metro Transit
metrotransit.org/brt

Bus Rapid Transit (Nidaam Gaadiid Bas oo Mashquul badan) Gaadiid dhaqso badan, la isku halayn karo, oo raaxo badan

Metro Transit waxa ay horumarinaysaa shabakada leenanka bus rapid transit (gaadiidka mashquulka badan ee baska) ee gobolka Twin Cities. Habkan wax ku oolka ah ee loo dedejiyo adeegga ayaa si weyn u wanaajinaya khibradda macmiilka waxayna caddaysay inay soo jiidato dad badan si ay si joogto ah u isticmaalaan gaadiidka.



Saldhigyada xaafadaha oo leh adeegyo

Saldhigyada waxaa lagu qalabeeyay sifooyin loogu talagalay waayo-aragnimo badbaado iyo raaxo leh, oo la mid ah tareenka korontada ku shaqeeya.

- NexTrip waqti saxda ah ee imaanshaha iyo macluumaadka tagista
- Kulaylka la rabo, nalka amniga, iyo isgaarsiinta xaaladaha degdegga ah
- Near-level boarding – ugu lugaa baska adigoo wax jaraanjaro ah u fuulin
- Dhigashada Baaskiilka iyo haraaga qashinka ah

Joogsiyo xadidan, adeeg joogto ah

BRT waxay shaqayn doontaa 10kii daqiiqoba mar inta badan maalinta iyada oo saldhigyo ku leh 1/3 ilaa 1/2 mayl kasta.

Sida qorshayntu u socoto leen kasta, Metro Transit waxay qiimeyn doontaa suuqa iyo baahida loo qabo adeegga baska deegaanka ee dheeraadka ah ee meelaha ku teedsan waddada.

Bixinta qiimaha safarka kahor inta aan la gaarin joogsiyada degdegga ah

Si aad dhakhso ugu gasho albaabada oo dhan, basaska BRT ma qabaan sanduuqyada lacagta lagu rido. Macaamiisha ayaa iibsaa doona tigidh ama waxay ku dhufan doonaan Go-To Card ee laga helo saldhigga, sida tareenka korontada ku shaqeeya. Kormeerka lacagta waxa samayn doona booliiska Metro Transit.

Kaabayaal cusub si loo kordhiyo xawaaraha

Marka lagu daro saldhigyada la hagaajiyay iyo kala dheeraynta joogsiga ballaaran, Metro Transit iyo la-hawlgalayaasheeda ayaa sahaminaya fursadaha si ay xadadkan BRT uga dhigaan mid aad u dheereeya. Doorashooyinka waxaa ka mid ah:

- Mudnaanta ishaarada si aad u sii socoto; basaska waxay "weydiisan karaan" nalalka cagaaran ee hore ama fidsan ee isgoysyada qaarkood
- Jidadka baska-kaliya ee ku teedsan qaybo ka mid ah leenka si basaska looga ilaaliyo taraafikada